

Maxay tahay Kaalmada Caafimaadku?

Kaalmada Caafimaadku waa barnaamij daryeel caafimaad oo dadweynuhu maalgeliyo. Minnesota waxa la yidhaahdaa “Medical Assistance” meelo kalena waa “Medicaid”. Medical Assistance waxay bixisaa adeegyo kala duwan oo caafimaadka la xiriira. Waxa kale oo jira barnaamijyo oo laga helo Medical Assistance oo bixiya xulasho adeegyo oo leh dabacsanaan oo xornimo dheeraad ah xagga doorashada. Hagahan Arc wuxu sharxayaa adeegyada iyo barnaamijyada qaar ee Medical Assistance ee aad loo isticmaalo.

Maxaa ka mid ah adeegyada qaar uu bixiyo Medical Assistance?

Adeegyada Caaymiska Caafimaadka ee Caadiga: Medical Assistance waxay dabooshaa adeegyada ay daboolaan caadi ahaan adeegyada gaarka ahi—biilasha caafimaadka, dawada, isbitaal jifka.

Adeegyada xaalada Adag: Waxa loo heli karaa baahida caafimaad iyo habdhaqan. Adeegyada xaalada adag waa adeegyo muddo gaaban la siiyo dabcinta/taageerada daryeel-bixiyaha iyo/ama dhawritaanka qofka naafoda ah.

Dabiibitaanka Hawsha: Dabiibitaanka Hawshu wuxu ka gargaaraa dadka qabashada nolol maalmeedka. Dabiibitaanka Hawshu wuxu culayska saara addimada dhaqdhaqaaqa halka dabiibka jidhku oo culayska saar dhammaan dhaqdhaqaaqa. Dabiibitaanka Hawshu waxa kale oo uu fiiriyaa dareenada.

Adeegyada Kaaliyaha Daryeelka Qofka: A PCA waa qof gurigiisa iyo bulshada dhexdeeda ku siinayais taageero qof naafoda ah. Qiimaynta u-qalmanaanta iyo heerka daryeelka waxa buuxiya kalkaaliyaha caafimaadka dadweynaha oo ay ka kormeeraan kalkaaliye aqoon leh. Adeegyada waxa ku jira taagerada nolol maalmeedka—sida cunista, dhar xidhashada, musqusha iwm..

Dabiibitaanka Jidhka: Dabiibka jidhku wuxu kordhiyaa dhaqdhaqaaqa iyo shaqaynta, yareeyaa xanuunka oo kor u qaada madax banaanida.

Kalkaaliyaha Shaqada Gaarka: Caafimaad ahaan adeegyo kalkaaliye oo daruuri ah oo lagu bixiyo guriga qofka.

Dabiibitaanka Hadalka: dabiibitaanka hadalku wuxu culayska saaraa qiimaynta iyo daaweynta xaalad hadal, af, garasho iyo liqitaan.

Maxay yihiin banaamijyada laga heli karo Medical Assistance eel eh dabacsanaan?

Deeqda Taageerada Qoyska: Waxa hela da’da 18 iyo ka yar. Waxay bixisaa adeegyada iyo taageerada dhawritaanka ama daahinta meelaynta meel aan guriga ahayn.

Deeqda Taageerada Macmiilka: Tan I waxay bixisaa taageerada dhawritaanka ama daahinta meelaynta meel aan guriga ahayn. Deeqdan waxa loo habeeyey bixinta adeegyada dadka u baahan dhaafitaan laakiin aan heli karin sabab ah macduunka dhaafitaanka.

Dhaafitaanka Naafonimada Korrinka – Xaalado la Xiriira : Adeegsiga lacagta ee adeegyada guiga ama bulshada dhexdeeda ee ah beddelka daryeelka muhiimka ah (ICF-MR care).

Dhaafitaanka Dhaawac maskaxda ah TBI: Adeegsiga lacagta ee adeegyada guiga ama bulshada dhexdeeda ee dadka ka yar 65 jir ee qaba dhaawac maskaxda ah ee ay qabato dhimitaan xaga garashada iyo dabecada ee u baahan heer daryeel meel lagu daryeelo oo gaar ah ama isbitaalka habdhaqanka dareenada.

Dhaafitaanka CADI (Beddelka Bulshada ee Dadka Naafoda ah): Adeegsiga lacagta ee adeegyada guiga ama bulshada dhexdeeda ee dadka jirrada rasmiga ugu jifka ee ka yar da’da 65 ee u baahan heerka daryeelka guryaha waayeelka.

Dhaafitaanka CAC (Beddelka daryeelka Bulshada): Adeegsiga lacagta ee adeegyada guiga ama bulshada dhexdeeda ee dadka rasmiyan u jirran ee naafoda ah ee ka yar da’da 65 ee u baahan daryeel joogto ah (isbitaal).

Dhaafitaanka Waayeelka EW (Elderly Waiver): Adeegsiga lacagta ee adeegyada guiga ama bulshada dhexdeeda da’da 65 iyo ka weyn ee u qalma Medical Assistance ee u baahan heerka daryeel guryaha waayeelka lagu daryeelo.

Wixii macluumaad dheeraad ama adeegyo u-doodid ah, kala xiriir Arc Greater Twin Cities 952-920-0855 ama booqo www.arcgreatertwincities.org.

Dhokomentigani ma aha talo sharci ah, in sidaas loo dhigana ma aha. Taas darteed, macluumaad halkan ku qorani ma beddeli karaan talada garyaqaan. Xarunta Sharciga Naafada Minnesota waxa lagala xiriir karaat (612) 334-5970.